



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## PD Newsletter




### Kusoo Dhawaw 2020!

Kani waa wargeys sadexdii bilood ah oo ay soo saarto Department of Children, Youth & Families (DCYF) ee bulshada barashada hore ee Washington.

Hadafka wargeysku waa inuu ku ogeysiyo dhamaan shaqooyinka weyn ee qabashada Hormarka Xirfada.

***Waxaa ku jira waxbarasho, korniin iyo waxyaabo badan oo sanadka cusub ah. Salaan!***



---

### Wargeyskan waxaa ku qoran...

- Macluumaadka Waxbarashada iyo Shuruudaha Shaqaalaysiinta
- [Wax Ka Baddalka Tabobarka](#)
- [Fursadaha Hormarinta Xirfadeed](#)
- [Caawinta Shaqaalaha Barashada Hore ee Waxbarashada](#)

- [Yay yihiin Method to Extend Research in Time \(Qaabka Daraasada Wakhtiga Lagu Balaadhiyay, MERIT\) Gals?](#)
- [Badalka Bixiyaha Waxbarashada Hore](#)
- [Gudida Talobixinta Tababaraha iyo Eegista Shaqaalaysiinta Barkada](#)
- [Fariinka socota Xogyahaha DCYF](#)
- [Maxaad Ku Sugantahey?](#)
- [Iska Waran?](#)

---

## Macluumaadka Waxbarashada iyo Shuruudaha Shaqaalaysiinta

Hoos waxaa ku qoran guudmarka xeerka la dhaqan geliyay macluumaadkiisa iyo isbadalaha Cutubka 110-300 Washington Administration Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC) ee la xidhiidha Hormarka Xirfada, Tobobarka iyo Shuruudaha qaybaha ah.

Shaqooyinka soo socdaa ma waafaqsana inta ay ka shaqaynayaan inay buuxiyaan waxbarashada shanta sano. Ka tanaasulida liisanka looma baahna.



## Kaalmada guriga qoyska iyo hogaanka ee marka aan la haysan shahaadada dugsiga sare

Hogaanka iyo kaalmada macalimiinta ee guriga qoyska marka aan la haysan shahaadada dugsiga sare waxa ay ka shaqayn doontaa shuruudaha dhan ee waxbarashada ee WAC 110-300-0100 kaas oo la dhamaystirey Agoosto 2024. Ka tanaasulida liisanka haysata ama cadaymo looma baahna inta la buuxinayo shuruudaha waxbarashada inta ay socoto ee la bixiyayaashu ayna u hogaansamin liisanka.

## Maamulayaasha xarunta, kaaliyayaasha maamulayaasha iyo kormeerayaasha barnaamijka ee la shaqaalaysiiyay intii u dhaxaysay Agoosto 1, 2019, iyo Diseember 7, 2019.

Maamulayaasha xarunta, kaaliyayaasha maamulayaasha iyo kormeerayaasha barnaamijku ee la shaqaalaysiiyay intii u dhaxaysay Agoosto 1 iyo Diseember 7, 2019, waa inay ka shaqeeyaan shuruudaha waxbarashada ee WAC 110-300-0100 oo lagu dhamaystiraan Agoosto 2024. Kahor Diseember 7, 2019, WAC 110-300 ma saamayn doono shuruudaha Maamulka, taas oo ka dhigan in maamulaha xaruntu, kaaliyaha maamulaha ama kormeeraha barnaamijku uu wakhtigaas soo galayo oo aanu markaa laga dhaafaynin u hogaansanka iyo ka tanaasulka liisanka aan loo baahnayn.

## Shaqaalaha AA, BA digriiga haysa ama wixii ka sareeya ee aan ahayn ECE ama wixii la xidhiidha

Shaalaha haysta digriiga labada sano, baajolarrka ama wixii ka sareeya looma arkay inayna u hogaasamin shuruudaha waxbarashada. DCYF waxa ay ka shaqayn doontaa qaab aad markaa ku yaraynayso farqiga u dhaxeeya waxbarashada iyo khibrada laga bilaabo digriiga la qaatay, xataa hadii aanu ahayn digrii ECE ah. Wakhtigan, waxa uu kani noqon doonaa qaab kale oo lagu buuxiyo shuruudaha waxbarashada. Bixiyayaasha kama baxayaan u hogaansanka shuruudaha liisanka ee ku saabsan WAC 110-300-0100 ee shaqada DCYF ee nidaamka. Ka tanaasulida liisanka looma baahna.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan buuxinta shuruudaha ama khayraadka la heli karo, fadlan kala xidhiidh Kooxda Taageerada MERIT [dcyf.merit@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.merit@dcyf.wa.gov).

---

## Wax Ka Baddalka Tabobarka

### Tobobarka Nidaamyada Xoojinta Shaqada ee Maarso-da Soo Socota



In la maamulo barnaamijka waxbarashada hore bilaa tobobar maamulka ahi waxa uu noqon karaa wax adag, waana taas sababta DCYF ay u diyaarinayso tobobar ka socda gobolka oo dhan *Nidaamyada Xoojinta Shaqada*.

Tobobarkan waxaa diirada lagu saari doonaa xirfadaha shaqada ee xifrada barnaamijka waxbarashada hore ee loo baahan yahay si markaa ay u koriyaan ganacsiga daryeelka ilmaha oo ay markaa heer u gaadho.

Tobobarka waxaa la heli doonaa Maarso, markaa u diyaar ahaw!

---

## Dhamaystirka Child Care Basics (Daryeelka Ilmaha Aasaasiga ah)

Daryeelka Ilmaha Aasaasiga ah (Child Care Basics, CCB) waxaa weeye tobobar hore oo lagu buuxinayo shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada ee macalinka ka shaqaynaya xarunta liisanka haysata.

Hadii shuruudaha tobobarka hore ay muuqato in la buuxiyay, markaa looma baahan in wax kale lagu daro markaas.

Waxaa jira dariiqooyin badan oo lagu buuxin karo Daryeelka Ilmaha Aasaasiga ah, oo ay ku jiraan:



- **Tobobarka Daryeelka Ilmaha Aasaasiga ah**
- **ECED&107 ee Caafimaadka, Badabaadada & Nafaqada**
- **ECED&100 ee Daryeelka Ilmaha Aasaasiga ah**
- **Waxbarashada Caruurnimada Hore + Dariska onlineka ah ee DCYF**
- **Head Start, Barnaamijka Kaalmada iyo Waxbarashada Hore ee Caruurnimada (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP), Wada Shaqaynta Degmada Dugsiga**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ikhtiyaarkan, booqo **Completing Child Care Basics (NEED LINK!)**.

---

## Tobobarka Badbaadada Hurdada



Tobobarka Badbaadada Hurdada waxa ay u baahan yihiin shaqaalaha xaruntu sanad kasta kuwaas oo liisanka u haysta xanaanada sabiyada.

Isbadalka [WAC 110-300-0106\(8\)](https://www.wa.gov/department-of-social-and-humanservices/child-care/early-childhood-education-and-assistance-program) Diseember 7, 2019, waxay meesha ka saaraysaa shuruudaha fasalada socod baradka.

Tobobarkani waxa uu u baahan yahay in lagu buuxiyo iyada oo la dhamaystiranayo Huradada Badbaadada ah ee [Daaqada Tobobarka](#) DCYF.

---

## Fursadaha Hormarinta Xirfadeed

## Tobobar Online ah oo Bilaash ah oo Nafaqada iyo Jimicsiga Jidhka ah

Washington State Department of Health iyo University of Washington Center for Public Health Nutrition waxa ay bixiyaa tobobarka STARS oo bilaash ah oo online ah oo ku saabsan nafaqada, jimicsiga, naasnuujinta iyo saxaafada oo waxaana loo isticmaalaa habdhismeedka waxbarashada hore.

Tobobarku waxa weeye 1 ama 1.5 saacadood oo ay STARS bixiso oo ku saabsan Caafimaadka, Badbaadada iyo Nafaqada waxaana laga heli karaa websaytka Department of Health [Nafaqada iyo Firfircoonida Waxbarashada Hore.](#)



NOURISHED & ACTIVE  
IN EARLY LEARNING



### Jilaal Musalsalka Webinar

Musalsalka webinar waxa diirada lagu saaraa shuruudaha waxbarashada iyo tobobarka.

Musalsalku waxa uu bilaabmey Noofember. Hadii aad ka maqnaato webinar, waxaad ka heshaa [Wargeyska DCYF iyo boga Webinars.](#)

### Janaayo: Sideen ula kulmi karaa Shahaadooyinka Shaqaalaha hadii aan heysanin koolaj uun?

- Salaasa, Janaayo 21 markey tahay 6 galabnimo.
- Webinarkan wuxuu ka caawin doonaa bixiyaasha iney fahmaan waxey u baahanyihiin iney qabtaan ula kulmaan shahaadooyinkooda hadii ayna heysanin digrii ama shahaadada koolajka.
- [Halkan ka diiwaangelin.](#)

### Febraayo: Isku Xidhista Dhamaan. Horumarinta Xirfadeed, Tababar iyo Baahiyo.

- Salaasa, Febraayo 18 markay tahay 6 galabnimo.
- Webinarkan wuxuu bixin doonaa dul ka eegis dhamaan baahiyaha shahaadooyinka shaqaalaha.
- [Halkan ka diiwaangelin.](#)

### Maarso: Qorshee Mustaqbalkaaga ee Albaabka Qorsheynta Mustaqbalka

- Salaasa, Maarso 24 markey tahay 6 galabnimo.

- Webinarkan wuxuu bixin guudmarka Albaabka Qorsheynta Mustaqbalka. Albaabku wuxuu kaa caawin karaa inaad qorsheyso mustaqbalkaaga, waxka barato wadooyinka mustaqbalka ee waxbarashada caruurnimo hore oo baadho dookhyada waxbarashada.
- [Halkan ka diiwaangelin.](#)

---

Ee suaalaha ama hadii aad jeclaan laheyd inaad codsato marduuc webinar mustaqbalka, iimeel usoo dir [Marlene White.](#)

---

## Caawinta Shaqaalaha Barashada Hore ee Waxbarashada

DCYF lamaanayaasha ee bulshada waxbarashada sare si loo nashqadeeyo oo loo bixiyo barnaamijyada waxbarasho oo kala duwan si loo caawiyo shaqaalaha barashada hore.

Si lagu ogeysiyo barnaamijyadan iyo kheyraadyo waxbarasho, booqo [DCYF Waxbarasho iyo Deeqyo Waxbarasho \(Education and Scholarships\)](#) bogga.



## Yakima Waxbarasho Dhamaystiran

[Yakima Valley College](#) waxa ay u dabaal dagaysaa guusha ardayga ECE marka ay ardaydu qaataan Shahaadada Hore.

Ardaydu waxa ay wax ka barten korniinka ilmaha iyo qaabka wakhtigan kaas oo ka caawinaya qoysaska iyo caruurta bulshada dhaxdeeda ah inay dugsiga diyaar u noqdaan. Ardaydu waxay sidoo kale wax ka baran karaan dheelitirka shaqadooda, nololaha iyo waxbarashada si ay markaa u noqdaan hogaan bulsho.

Barnaamijyadan shahaadadu waxa lagu bixiyaa Isbaanish, taas oo u sahleysa inay ardaydu bartaan oo ku dhamaystirtaan shahaadada luuqadooda hooyo - maanay cajiib ahayn!



*Sawiru waxa weeye ardayda Yakima Valley College, xarunta Yakima iyo sidoo kale xarunta Grandview.*

## Qaabka Macalinka Ururka Qaran ee Waxbarashada Caruurta Dhalinyarta ah (National Association for the Education of Young Children, NAEYC): Margarita Barragan

Margarita Barragan waxa ay ku kortey Tieton, Washington. Dugsiga sare, waxay doonaysay inay barato kaaliye caafimaad oo markaa kadibna ay noqoto dhakhtar caruur, laakiin nolosheedii ayaa dariiq kale qaaday oo waxa ay hooyo ku noqotay 19 jir.

Waxa ay fursad u heshey inay ka sahaqayso Head Start deegaanka markii uu ilmaheedu ahaa 4 bilood jir, oo waxa ay ka shaqaysaa halkaas 17 sano kadib.



Margarita waxa ay jeceshahay inay la shaqayso caruurta iyo qoysaska oo waxay qorsheyneysaa inay waxbarashada sare gasho si ay markaa u kordhiso dadaalkeeda caawinta caruurta inay gaadhaan xanaanada caruurta.

[Waxaad sheekada dhan ee Barragan ka akhridaa halkan.](#)

---

## Yay yihiin MERIT Gals?

Inta lagu jiray webinar-kii dhawaa, ka qayb galayaashu waxay yidhaahdeen **"Yay yihiin MERIT gals? Mar kasta dadka ayay wax u taraan!"** Sidaas ayaanu laftaayadu u aragnaa oo waxaanu doonaynaa in aanu la kulano!

Kooxdan yar ee cajiibka ahi ee ka kooban sadexdu Waa koox taageerada jiida hore ah wada. Waxaa kowaad ee diirada la saarayaa waa lagu caawiyo dhamaan bixiyayaasha Gobolka Washington oo lasiiyo macluumaad ku saabsan waxbarashada, shahaadooyinka, shuruudaha, iwm.

Celcelis ahaan, MERIT gals keena ayaa ka jawaaba ilaa 800 oo iimeel iyo 300 oo fariimo cod ah todobaad kasta.



---

### Erin

*Waxa aanu ahayn xubinta cusub ee kooxda khabiirada taageerada MERIT-waxaan ku faraxsanahay in aanu bulshadan kusoo biiro. Hooyo kali ah ahaan oo haysata laba caruur ah, waxa aad iiga go'an in aan taageero shaqada waxbarashada hore waxaan sameeyaa wax badan oo aan bulsheeda ku xoojinayo guud ahaan. Taariikhdayda shaqo waa in aan qoro daraasadaha, oo dejiyo wixii ku xeeran jinsiga iyo halmada iyo isticmaalkeeda. Waxa aan qoray buug waxaana*


*weeye masuuliyad shakhsi ahaaneed oo i saaran in aan abuurto, qaab fikir naxariis oo dhamaan noloshu dhan ah"*

---

### Monica

*Waxa aan la shaqaynayay DCYF ilaa Abriil 2019. Waxa aan jecelahey waxa weeye qoyskayga iyo sidoo kale dadka kale inaan caawiyo.*

Monica waxa ay khibradeeda gaadhsiiyay adeega macmiilka iyo taageerada 20 sano oo khibrad ah oo ay la shaqaynaysay tukaamada, waaxda waxbarashada sare iyo caalamka samafalka.





## Sandra

Waxa aanu is qabney 22 sano Oscar oo waxa aanu leenahay laba hablood oo qurux badan, Alyssa iyo Angel. Labadayda habloodba waxay ku jiraan wakhtigan Eastern Washington University. Waxa aan hore ugasoo shaqeeyay waaxda caafimaadka ku dhawaan 10 sano iyo waaxda waxbarashada shacabka ee K-12 9 sano oo kale kahor inta aanan ku soo biirin Waaxda Waxbarashada Hore (Department of Early Learning, DEL), oo iminka ah DCYF, 2018. Waxaan jecelahay inaan ka qayb qaato Kooxda MERIT oo aan ku taageero xirfadahaayaga shaqada daryeelka hore iyo waxbarashada!

## Ma u baahan tahay Inaan La Xidhiidho MERIT?

limeel: [DCYF.MERIT@dcyf.wa.gov](mailto:DCYF.MERIT@dcyf.wa.gov)

Taleefanka: 1-866-482-4325 (ikhtiyaar 5)



## Ma Doonaysaa Inaad ku Biirto Kooxda? Shaqaale Ayaanu Qaadanaaynaa!



Kooxda Hormar Xirfada waxay taageeraan xirfadlayaasha waxbarashada hore oo shaqadaayadu waxa ay ku xeeran tahay caruurta, dhalinyarta iyo qoysaska reer Washington.

Hadii aad doonayso inaad qayb ka noqoto kooxda taageera macalimiinta iyaga oo u shaqaynaya caruurta iyo qoysaska Gobolka Washington, waxaa markaa aad dalban kartaa jagooyinkan!

- [Khabiir Hormarka Xirfadle iyo Taageerada Duwaanka Shaqaalaha: \\$2,844.00 - \\$3,682.00 Bishii](#)

## Badalka Bixiyayaasha Waxbarashada Hore

Miyaad ogtahay in bixiyahya guriga qoyska ee leh caruur ku jira oo qaata kaabista gobolka, inaad heli karo shan maalmood oo caymiska badalka ah sanad kasta?

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato waxa aad u isticmaali karto badalka, sida aad u qaabaysan karto caymiska ama inaad gacan ka gaysato badal dheeraad ah, waxaad akhridaa [Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha ee Qoyska.](#)



## Wakhti Ugu Deeqa Xarunta Waxbarshada Hore



DCYF waxa ay aqoonsataa dadka wakhtigooda ugu deeqa xarumaha waxbarashada hore kuwaas oo haysta khayraad muhiim ah.

Hadii barnaamijka waxbarashada hore laga dhaqan geliyo oo lagu taageero cida wakhtigeeda ku deeqa ee xarumahooda, waxaa jira shuruudaha qaar oo ay tahay in markaa la buuxiyo.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato shuruucda qayb ahaan ee wakhti ku deeqa xarumaha waxbarashada hore [riix halkan.](#)

## Gudida Latalinta Tobobaraha iyo Shaqaalaysiinta Kormeerayaasha Badan



### Gudida Latalinta Tobobaraha

Gudida Latalinta Tobobaraha (Trainer Advisory Board, TAB) waxa ay wakhti xaadirkan ka shaqaynayaan madashooda xigta. TAB waxa ay kala talisaa DCYF tobobaraha iyo xeerka iyo nidaamyada sugida tayada tobobarka. Xubnaha waxaa loo shaqeeyaa laba sano mudo ah oo waxaa masuuliyadaha kamid ah:

- Samaynta ugu yaraan laba (2) kormeer oo arjiyada tobobarka ah iyo tobobarka wakhtigan ee gobolku ansixay laba jeer sanadkii

- Inay ka qayb galaan kulanka sadexdii bilood ah
- In la bixiyo talooyin taageerada tobobarka iyo xidhiidhka ka dhaxeeya waxbarashada

TAB waxa ay ka kooban tahay xirfadlayaal waxbarashada sare, tobobarayaal bulshada ku saleysan, hay'ado gobol iyo hay'adaha bulshada. Waxaa mudnaan u ah gudida waa xubnaha inay kasoo jeeda bulshooyin kala duwan luuqadooda, dhaqankooda iyo khibradooduba.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato in aad geli karto Gudida Latalinta Tobobarka kala xidhiidh [training@dcyf.wa.gov](mailto:training@dcyf.wa.gov).

## Kormeerka Wadarta ee Tobobaraha

*Ma doonaysaa inaad kordhiso tayada tobobarka ee caruurnimada hore iyo caruurta da'da waxbarashada gaadhay lasiiyo?*

Waxa aanu doon doonaynaa wakiilo kala duwan oo kasoo jeeda meelo kala duwan si ay u kormeeraan tobobarayaasha gobolka oo dhan.

Kormeeraha tobobarku waxa uu ka caawinayaa DCYF dalbadayaasha doonaya inay noqdaan tobobareyaal. Waxa ay ka caawiyaan shaqooyin kala duwan, oo ay ku jiraan:

- Tobobarka kormeerka iyo la socodka joogtada ah ee tobobarka gobolka oo dhan ee jire.
- In la xaqiijiyo tobobarka inay ku jiraan macluumaad aad u tayo sareeya oo markaa la bixiyo
- Ku xidhida tobobarayaasha hormar xirfada oo kala duwan fursado ah iyo khayraad

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato la xidhiidh [training@dcyf.wa.gov](mailto:training@dcyf.wa.gov)



## Fariin ka timid Xogiyaha DCYF



Xogiyaha DCYF Ross Hunter waxa uu inala wadaagay fariinta bisha si uu markaa inoo siiyo macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo [waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).

- [Wargeyska Janaayo](#)
- [Wargeyska Diisambar](#)
- [Wargeyska Noofember](#)

Hadii aad qabto wax su'aal ah ama faalo ah, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiskeeda Xidhiidhka](#).

## Maxaad Haysaa?

Ma jiraan warar ama barnaamijyo wanaagsan oo aad nooga haysaa Hormarka Xirfada (Professional Development, PD) oo aad markaa doonayso inaad nala wadaagto? Waxaad noosoo dirtaa anaka oo waxa aan eegi doonaa qaabka aanu usoo gelinayno Wargeyska PD ee danbe.

Macluumaadka u dir [Marlene White](#).



---

## Sidee Ayaanu Wax u Wadnaa?



Fadlan waxaad noogu sheegtaa sida aanu wax u wadno adiga oo galaya [xog uruurinta kooban](#).

Hadii aad qabto wax su'aal ah, talo ama aad doonayso inaad nala soo xidhiidho, fadlan iimeel u dir [Marlene White](#).